

Sidan 1/Bogga 1:

CAYAYAANKA GURIGA

Macluumaad iyo talooyin ku socda qofka degan guri kiro ah

Sidan 2/Bogga 2

Haddii aad guriga ku aragto cayayaan waa inaad sida ugu dhakhso badan ee suurtoogalka ula soo xidhiidho shirkada guryaha si looga hortaggo inay fido. Marka la buufinaayo ee ka daaweynta ka dib waxaa aad u muhiim ah in aad qofka kiraysteha ahi uu ka caawiyo oo uu raac tilmaamaha aad helayso si cayayaanka aanu did ugu soo noqon.

Sidan 3/Bogga 3

Tusaale ka mid ah cayayaanka

Waxa jira noocyo badan oo cayayaan ah:

- Qaarkood waxa ay weeraraan cuntada iyo maryaha, sida tusaale ahaan daaniyaha, geesoolaha ama jiriqaaga.
- Qaar ayaa dadka dhiba sida tusaale ahaan, tagfida/boodad iyo injirta.
- Qaar ka mid ah waxa ay weeraraan geedaha, tusaale ahaan aboorka.

Dukhaanka iyo baranbarada

Xiliyadii danbe ayaa dukhaanka iyo baranbartu bilaabeen in ay aad ugu sii faafaan Iswiidhan. Markaa si dheeraad ah uga digtoonow haddii aad aragto, sida ugu dhakhsaha badan ula xidhiidh shirkada guryaha oo raac tilmaamaha ay ku siiyaan.

Dukhaanka

Dukhaanka ayaa habeenkii shaqeysta isagoo ku nool inuu dadka ka nuugo dhiiga. Dhererkoodu waa 5–8 millimeter, maariin casaan xigga oo u eeg jirigaa yaryar oo bar ah.

Xaarka madow, wasakhda dhiiga oo go'a ku taala iyo finan jidhka ka soo baxa qaniinyada darteed ayaa noqon kara calaamadaha in aad leedihiin dukhaan. Haddii aanad hubin taas, ayaaad tijaabin kartaa inaad xabag laba dhinac ah ku wareejiso sariirta hoosteeda. Haddii aad leedihiin dukhaan ayay ku dhagi doonaan xabagta maalmaha soo socda. Si taxadirleh ugu fiirso haddii ay guriga kuu yaalaan alaabta guryaha oo duug ah sida kuraasta fadhiga iyo sariiraha, kuwaas ayaa faafin kara dukhaanka. Si loo dabartiro dukhaanka ayaa loogu baahan yahay buufin. Marba marka ay ka sii horeyo marka aad hesho ayay kolba ka sii dhib yaraan kartaa in la dabar tiro.

Talooyinka lagaga baxsanaayo dukhaanka marka aad safreyso.

- Ku gur dharkaaga iyo waxyaabo kale bacda balaastiigga ah oo xidhan.
- Bagaashkaaga ku keydi musqusha.
- Hubi sariirta iyo alaabta taala meel u dhow sariirta. Ka fiiri calaamadaha dukhaanka sariirta iyo furaash hoostooda.
- Iska ilaali inaad shandad dhigto sariirta dusheeda ama hoosteeda.

Markaa marka safarka ka soo laabato:

Shandadaada ku xidhiidho meel iftiin wacan leh oo ka fog dharka guriga (ma aha sariirta dusheeda) Si taxadir dheerad ah loo sameeyo ayay wanaagsan tahay in dharka la meydho oo qalajisada lagu rido marka la soo laabto ama talaagada barafka toos loogu rido marka aad guriga ku soo laabato.

Baranbarada

Baranbarada ayaa kaa cuni karta raashinkaaga, wasakheyn doonta oo leh ur qadhmuun. Waxay sidoo kale weerartaa maryaha, waraaqaha iyo haraga. Baranbaradu waxay ayay fidisaa iyado loo arko nadaafad darro.

Baranbaradu waxa uu dhererkeedu noqdaa 12 - 1 millimitir. Waxay inta badan ka heshaa foomada, tuunbooyinka kuleylka, mishiinka talaagada. Iyo meelaha kale ee heerkulku yahay 25–33 °C. Waxa weeye mid iftiinka ka dhumata iyadoo madowga iyo godadka dhuudhuuban isku qarisa.

Talooyinka lagaga baxsanaayo baranbarada marka aad safreyso:

- Masax oo guriga nadaafadiisa dhowr, markaas ayaad ka qaadeysaa cuntada baranbarada.
- Raashinka ku keydi daadado daboolan ama bacaha balastiga.
- Tuur bacaha qashinka inta badan si aan urta cuntadu u soo jiidan cayayaanka.
- Iska dhor in cuntada xawayaanka gurigu ay dibad taalo muddo dheer.
- Eeg meelaha uu qoayaanku dhaawacay ee gurigaaga, halkaas ayay ka heshaa baranbartu.

Talo haddii aad ka shaki qabto inaad leedahay baranbaro waxa weeyey inaad soo jiiido shoolada. Haddii aad ka hesho baranbar guriga ayay inta badan isku qariyaan halkaas.

Cayayaanka waaweyn

Ka fikir in aanad balakoonka cunto ugu daadin shinbiraha ama meelaha banaanka, maxaa yeelay cuntada la daadiyey waxay soo jiidanaysaa jirka iyo ratiga.

Haddii aad gurigaaga ku aragto dooli ama jir ama meel kale, la soo xidhiidh kireeyahaaga guriga ama shirkada buufinta ee aad heshiiska la leedihiin si dhibaataada wax looga qabto.

Sidan 4/Bogga 4

Cayayaanka caadiga ah

Pälsänger & pälsängerlarv (xaarwalwaal)
Vågbandad pälsänger (buuryo goys)
Brödbagge (daaniye)
Fläskänger (jiriqaa)
Husbock (geesoole)
Mjölbagge & mjölbaggelarv (daaniye iyo ugxanta daaniyaha)
Klädslus (injirta dharka)
Loppa (tagfi)
Dammlus (injirta carrada)
Vägglus (dukhaan)
Fruktmott (balanbalista khudrada)
Mottlarv (dirxiga balanbaalista)
Faraomyra (Macaan jecasha)
Silverfisk (Geesoole)
Kvalster (cayayaanka dhaska)
Klädsmal (Balankaalis/Xaydho weyn)
Råtta (Jirka)
Mus (Dooliga)
Kackerlacka (Baranbarada)

*Insticksblad till SABOs broschyr **Skadedjur i hemmet**
Språk: Somaliska*

Si toos ula soo xidhiidh kireeyaha gurigaaga haddii aad ak shakisan tahay inuu gurigaagu leeyahay cayayaanka guriga. Raac tilmaamaha lagu siinaayo marka la buufinaayo.